CHILDREN'S AID SOCIETY *of* TORONTO

LA SOCIÉTÉ DE L'AIDE *à* L'ENFANCE DE TORONTO

Xallinta Walwalka ama Cabashooyinka Macaamiisha

Ujeeddoyinka Ururka Daryeelka Carruurta ee Toronto, waxa weeye inay u fidiyaan waaliddiinta iyo carruurta adeegyada tayada ugu sarreysa leh. Haddii ay jiraan wax walwal ah ee ku saabsan adeegyadayada, waxaan dooneynaa inaan si wadajir ah u wada shaqaynno si aan u xallinno. Waxaan sidoo kale jira nidaam rasmi ah ee dib u eeggista cabashooyinkaaga sida u qeexayo Xeerka Adeegyada Carruurta iyo Qoyska.

Wax ka qabashada arrimaha kahor inta ayna noqon dhibaatooyinka

Waxaan ku dadaaleynaa inaan la shaqeeyno qoysaska, carruurta, iyo adeeg bixiyeyaasha kale dadaalka aan ugu jirnno si ay carruurta iyo dhallinyaradu ammaan u helaan. Waxa annu kugu dhiirigelinaynaa inaad la shaqeyso kooxda adeegga, shaqaalaha iyo kormeerayaasha, si caadi ah si loo xalliyo arrimaha markii ay soo ifbaxaan. Waxaa micno weyn saameynaya xallinta arrimaha inta aanay noqon dhibaato weyn.

Haddii ay kuu suurogeli weydo adiga oo la kaashanaya shaqaalaha iyo kormeeraha xallinta arrimahaas, waxaad la xiriiri kartaa Agaasimaha laanta xafiiska aad adeegyada ka heshid si aad taagyeero ugu heshid xallinta arrimahaas. Waxaad keensan kartaa qof ku taagyeera waqtigaas iyo mar kasta ee mustaqbalka ee wada hadal jiro, waa haddii aad rabto.

Habka Cabashada Rasmiga ah

Haddii dadaalka loogu jiro xallinta arrimaha adiga oo la kaashanaya kooxda adeegga ama agaasimaha laanta lagu guuleysan waayo, Ururku wuxuu leeyahay nidaam rasmi ah ee dib u eegis cabashooyinka. Nidaamkaani wuxu ka kooban yahay kulan aad la yeelatid Guddiga Gudaha ee Dib u Eegista Cabashooyinka (ICRP). ICRP wuxuu ka kooban yahay maamule sare ee CAST kaas oo aan hore ugu dhex jirin arrintaada, shaqaalaha kale hadba sidii loogu baahdo kaas oo aan u shaqeyn CAS (sida caadiga ah xubin ka mid ah Guddiga Agaasimayaasha ee CAS). Kaalinta ICRP waxa weeye inay fahmaan walwalka ku haya, helidda siyaabihii go'aan looga gaari lahaa, iyo caddeynta talaabooyinka xiga.

Cabashadaada waa inay tahay qoraal si ay u noqoto mid si cad loo fahmo. Waxaa loo soo diri karaa CAS boostada, faksi ahaan, e-mail ahaan ama gacan ahaan ayaa lagu keeni karaa. Toddoba maalmood gudahood kadib markii ay CAST hesho cabashadaada oo qoraal ah, waxaa laguu soo sheegi doonaa iyada oo qoraal ah in dacwadaadu ay mudnaan leedahay in dib u eegis ICRP ku sameyso iyo in kale.

Haddii cabashadaadu ay leedahay mudnaan, waxaa lagula socodsiin doonaa taariikhda la kulanka ICRP u dhacayo. Kulankaas waa in la qabtaa 14 cisho gudohood maalinta ogeysiiska la diray haddii aadan adigu weydiisan in dib lagugu dhigo maalin kale. Muddo 14 maalmood gudohood kadib la kulankii ICRP, waxaa lagusoo siin doonaa iyada oo qoraal kooban ah natiijadii kulanka, oo ay la socdaan wixii talaabooyinka xiga ee la qaadayo ee lagu heshiiyey. Waxaa naga go'an inaan kula xallinno cabashada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah.

Sida ku cad Xeerka 2007 ee U-doodidda Ilmaha iyo Dhallinta e Gobolka, (PACY) ilmaha ama dhalinyarada ama qof go'aan gaari kara ee metelaya (haddii ilmaha ama dhalinyaradu ayna awoodi karin inay go'aan qaataan) ayaa soo gudbin kara cabasho iyaga oo ka wakiil ah ilmaha ama dhalinyarada. Si kastaba ha ahaatee, waa in cabashada marka hore laga dhegeystaa Nidaamka Dhegeysiga Gudaha ee Ururka kaas oo la yiraahdo Guddiga Gudaha ee Dib u Eegista Cabashada ama Guddoonka Dib u Eegista ee Adeegyada ee Carruurta iyo Qoyska kahor inta aan loo gudbib PACY.

Dheeraad…

(...sii socota)

Xallinta Walwalka ama Cabashooyinka Macaamiisha

Arrimaha aan dib u eegi karno

- Walwalka ku saabsan adeegyada aad ka doonatay ama ka heshay Uruurka Daryeelka Carruurta ee Toronto.
- Walwalka ku saabsan saxnimada qoraalada kaa yaal CAS.
- Eedeymaha in carruurta iyo waalidiintooda aan la siin fursad in la dhegeysto fikraddooda markii go'aano laga gaarayey arrimo saameeya danahooda ay CAS gaareysay.
- Eedeymaha in CAS ku guuldareystay in ay bixiyaan sababaha cad ee go'aanka saamaynaya danihiinna.

Arrimaha aan dib u eegi karno

- Walwalka ku saabsan adeegyada aad u doonatay ama ka heshay hay'adaha kale.
- Arrimaha maxkamadda hor yaal ama ay maxkamaddu go'aan ka gaartay.
- Arrimaha kale ee ay tahay in go'aan laga qaato kaas oo la xiriira Xeerka Carruurta iyo Qoyska ama Xeerka Xiriirka Shaqada.

Waxaad sidoo kale haddii aad rabtid la Tashan kartaa Wasaaradda Carruurta iyo Adeegyada Dhallinyarada qoraalkooda "Ma qabto cabasho ku saabsan adeegyada aad ka doonatay ama ka heshay Urururka Daryeelka Carruurta ee Ontario? Kaas oo laga heli karo xafiisyadayada ama Wasaaradda.

Markasta oo lagu gudo jiro habka dacwada rasmiga ama ka dibba, waxaad codsi ku saabsan cabashadaada u gudbin kartaa Guddoonka Dib u Eegista Adeegyada Carruurta iyo Qoyska. Foomamka codsiga ee Guddiga Dib u Eegista Adeegyada Carruurta iyo Qoyska iyo macluumaadka ku saabsan nidaamka shaqada Guddiga waa la laga heli karo xafiiskyadayada ama kan Guddoonka laftiisa:

Guddonka Dib u Eegista Adeegyada Carruurta iyo Qoyska.
Tel: 416 327-4673,
www.children.gov.on.ca/cs/en/boards/CFSRB

Macluumaadka La xiriirka

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan samaynta cabasho, fadlan la xiriir shaqaalaha ama

Maareeyaha, Adeegyada Macmiilka ee Ururka Daryeelka Carruurta ee Toronto
30 Isabella Street
Toronto ON M4Y 1N1
416.924.4646

U-doodaha Gobolka ee Ilmaha iyo Dhallinta (PACY) waxaa lagala xiriiri karaa **1.800.263.2841**
ama **advocate@provincialadvocate.on.ca**